



Xarunta Horumarinta Shaqo ee Oregon ee Daryeelka Carruurnimada Hore iyo Waxbarashada
Su'aalaha Inta Badan La iska isweydiyo Barnaamijka Lacagta bixinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelka Carruurta

Waa maxay Barnaamijka Lacagta bixinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelka Carruurta?

Iyada oo ah dadaal lagu aqoonsanayo daryeel bixiyayaasha carruurta ee guud ahaan gobolka Oregon ee la xiriirta shaqadooda wanaagsan, Sharci-dejinta Oregon waxay lacag bixin sanadle ah oo dhan \$500 u qoondeysay daryeel bixiyayaasha carruurta ee u qalma sanadka 2024 iyo 2025! Shaqada aad qabataan macallimiinta waxbarashada carruurnimada hore ahaan waxay ka dhigtaa gobolkani uu haysto dhaqaale ku filan waxaanan rabnaa in aad idin dhahno mahadsanidina!

Waa maxay shuruudaha u qalmida ee loogu talagalay Barnaamijka Lacagta bixinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelka Carruurta?

Si aad ugu qalanto barnaamijka waa in aad buuxisaa dhammaan shuruudaha soo socda:

1. Aad hadda shaqo ka hayso mid ka mid ah kuwa soo socda ee ka jira Oregon
 - a. Qaybta Ruqsad bixinta Daryeelka Carruurta xarunta daryeelka carruurta oo ruqsad haysata
 - b. Barnaamij Ruqsad haysashada Laga dhaafay ama Diiwaan gashan oo helaya lacagaha kabista ah ee Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC)
 - c. Qoys, saaxiib deris (FFN) helaya lacagaha kabista ah ee Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC)
2. Aad ka shaqeysay xirfadani ugu yaraan 90 maalmood ee jadwal sanadeedka
3. Aad shaqeysay ugu yaraan tobban saacadood toddobaadkii.
4. Aad leedahay [myORO](#) la cusbooneysiisay
 - a. Macluumaadka shaqada oo la cusbooneysiisay (magaca, cinwaanka, iyo lambarka telefoonka)
 - b. Macluumaadka shakhsi ahaaneed ee la iskala soo xiriirayo oo la cusbooneysiisay

Waa maxay macnaha “90 days”?

In lagaa shaqaaleysiiyay xarunta daryeelka carruurta oo ruqsad haysata, barnaamij ruqsad haysashada laga dhaafay ama diiwaan gashan, qoys, saaxiib deris muddo 90 maalmood ah.

Maxaa qaddarka lacageed ee Barnaamijka Lacagta bixinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelka Carruurta loogu talagalay immisa jeer ayaanan codsan karaa?

Aqoonsigu waa lacag hal mar la bixiyo oo dhan \$500. Waxaad sanad kasta hal mar codsan kartaa barnaamijka, 2024 iyo 2025. Waqtiga codsiga waa Maajo– Oktoobar 15, 2024 iyo mar kale Maajo 2025 – Oktoobar 2025

Waa maxay waqtiga hawsha lagu qabanayo ee loogu talagalay Barnaamijka Lacagta bixinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelka Carruurta?

WAQTIGA LOO QABTAY NIDAAMKA CODSIGA			
TALLAABADA 1		TALLAABADA 2	TALLAABADA 3
Codso Barnaamijka	Ka soo jawaab Email-ka Martiqaadka ah ee PaymentWorks	Dhammaan codsiyada macluumaadka waa in la xalliyaa	Qaybinta Lacag bixinta loogu talagalay codsiyada oo lagu dhammeystiro muddo aan ka dambeyn muddo aan ka dambeyn Noofambar 15
Maajo 31 – Oktoobar 15	Buuxi marka aad hesho	muddo aan ka dambeyn Noofambar 15	45 maalmo shaqo gudahood

Halkee baan ka heli karaa Codsiga Barnaamijka Lacagta bixinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelka Carruurta?

Codsiga Barnaamijka Aqoonsiga waxaa la heli karaa adiga oo gala koontadaada [myORO](#) Haddii aad awoodi weydo in aad gesho codsiga adiga oo isticmaalaya myORO fadlan email u dir occdrecognition@pdx.edu si aad u codsato wax iska reebid si aad u hesho codsi warqad ah.

Maxay tahay in aan ka ogaado buuxinta codsiga Barnaamijka Lacagta bixinta Aqoonsiga Shaqaalaha Daryeelka Carruurta?

Codsi dhammeystiran waxaad u baahan tahay in aad leedahay koontada [myORO](#) oo leh macluumaad la iskala soo xiriirayo oo la cusbooneysiisay iyo shaqada oo la cusbooneysiisay. Shaqada la cusbooneysiisay waxaa ka mid ah nooca xarunta aad u ka shaqeyso, cinwaanka aad ka shaqeyso, iyo lambarka telefoonka. Marka aad cusbooneysiiso macluumaadkaaga ka dib buuxi codsiga oo gudbi.

Ka dib gudbinta waxaad email martiqaad ah ka heli doontaa PaymentWorks si aad u sameysato koonto si aan kuugu soo diri karno lacag bixintaada. Haddii ay dhacdo in ay jiraan foomam iyo/ama macluumaadka PaymentWorks oo aan dhammeystirnayn, OCCD waxay wax la wadaagi doontaa macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay si loo dhammeystiro nidaamka lacag bixinta.

Maxaa codsi ka dhigi kara mid aan dhammeystirnayn?

Codsiyada macluumaadka maqan leh waxaa lagu calaamadeyn doonaa in aysan dhammeystirnayn waxaanad heli doontaa email kugu wargelinaysa waxa loo baahan yahay in la hagaajiyo. Codsiyada aan dhammeystirnayn lama bixin doono lacagtooda ilaa codsiga laga dhammeystirayo.

Sababaha Aanu u Dhammeystirnayn:

- Waxaan awoodi weynay in aan xaqiijino shaqadaada
- Codsigaaga oo aan ka turjumayn in aad hadda ka shaqeyso daryeelka carruurta oo ku yaala Oregon
- Codsigaaga oo aan ka turjumayn in aad shaqeyso ugu yaraan 90 maalmood ee jadwal sanadeedkani
- Codsigaaga oo aan ka turjumayn in aad shaqeyso ugu yaraan 10 saacadood toddobaadkii
- Adiga oo hore u gudbiyay codsi loogu talagalay jadwal sanadeedkani
- Macluumaadkaaga cidda aad u shaqeyso oo aan sax ahayn
- Macluumaadkaaga cidda aad u shaqeyso oo aan la xaqiijin karin

Sidee baan u gudbin karaa codsiga Barnaamijka Lacag bixinta Shaqaalaha Daryeelka Carruurta?

Buuxi codsiga dhanka internet-ka ah: <https://my.oregonregistryonline.org/>

AMA

Haddii aad awoodi weydo in aad gasho codsiga dhanka internet-ka fadlan wac (503) 725-6912

Portland State University (PSU) PaymentWorks

Codsadayaasha gudbiya codsi dhammeystirsan oo buuxiyaha shuruudaha lacag bixintu waxay heli doonaan email martiqaad ah si loo dhammeystiro koontada PSU PaymentWorks oo sugan si loo bixiyo macluumaadka W-9/W-8 ee loogu talagalay lacag bixinta. Codsayaashu waxay heli doonaan email martiqaad ah si ay u dhammeystiraan koontada PSU PaymentWorks oo sugan si loo bixiyo macluumaadka W-9/W-8 ee loogu talagalay lacag bixinta. Fadlan fiiri website-ka: <https://sites.google.com/pdx.edu/workforce-recognition/> wixii faahfaahin ah ee la xiriira sida loo dhammeystiro PaymentWorks

Goorma ayaan heli doonaa lacag bixintayda?

Lacag bixinta waxaa lagu soo saari doonaa 45 maalmo shaqo laga bilaabo dhameystirka nidaamka PaymentWorks.

Ayay tahay in aan la xiriiro haddii aan qabo su'aalo ku saabsan Barnaamijka Lacag bixinta Shaqaalaha Daryeelka Carruurta ama PaymentWorks?

Email-ka: occdrecognition@pdx.edu

Telefoonka: (503) 725-6912